ٱلصَّٰلِحَٰتِ مِنْهُم مَّغْفِرَةً وَأَجْرًا عَظِيمًۢا ٢٩

camal wanaagsanna falay oo mu‘miniinta ka mid ah dambi dhaaf iyo ajri wayn.

Riyada Nabiyadu waa xaq, Markuu Rasuulkuna arkay isaga iyo asaxaabta oo dawaafi Kacbada haddana laga soo celiyay inuu maka galo yaa dad waydiiyeen xaalkaas, markaasaa Eebe caddeeyay inay xaq noqon’wayna rumoowday Ru‘yadii, Nabigii iyo asaxaabtiina waa galeen iyagoo aamin ah’wayna dawaafeen sidii Eebe ugu yaboohay, Tan kale waa in mu‘miniintu isu naxariistaan dhexdooda, waase inay ku darraadaan iskana celiyaan gaalada’sida Eebe tilmaamay, Nabiguna wuxuu yidhi Mu‘miniinta is jacaylkoodu iyo naxariistoodu waxay la mid tahay jidh kaliya oo hadduu qaar jirrado qaarka kale la xanuunsan lana soo jeedi.
Rasuulka muxammad ah iyo asaxaabtiisa Kutubihii hore waa lagu tilmaamay wanaaggooda iyo isjacaylkooda iyo geesinnimadoodaba iyagoo lagu shabbahay Beer soo kacaysa, ee waa in raadkoodii la raacaa wanaaggoodiina lagu daydaa. Al-Fatx (27-29).

# Suurat Al-Xujuraat سُورَةُ الحُجُرَاتِ

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ لَا تُقَدِّمُوا۟ بَيْنَ يَدَىِ ٱللَّهِ
وَرَسُولِهِۦ ۖ وَٱتَّقُوا۟ ٱللَّهَ ۚ إِنَّ ٱللَّهَ سَمِيعٌ عَلِيمٌ ١

1. Kuwa xaqarumeeyow ha ku dagdagina Eebe iyo Rasuulkiisa hortiisa (waxayan fasixin), Eebana ka dhawrsada illeen wax walba wuu maqli wuuna ogyahaye.

يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ لَا تَرْفَعُوٓا۟ أَصْوَٰتَكُمْ فَوْقَ صَوْتِ
ٱلنَّبِىِّ وَلَا تَجْهَرُوا۟ لَهُۥ بِٱلْقَوْلِ كَجَهْرِ بَعْضِكُمْ
لِبَعْضٍ أَن تَحْبَطَ أَعْمَٰلُكُمْ وَأَنتُمْ لَا تَشْعُرُونَ ٢

2. Kuwa xaqa rumeeyow ha ka koryeelina codkiinna codka Nabiga, hana kula jahrina (qaylyina) hadal sida qaarkiin qaar ugula jahro (qaylyo) si aan camalkiinnu u burin idinkoon ogayn.

إِنَّ ٱلَّذِينَ يَغُضُّونَ أَصْوَٰتَهُمْ عِندَ رَسُولِ ٱللَّهِ
أُو۟لَٰٓئِكَ ٱلَّذِينَ ٱمْتَحَنَ ٱللَّهُ قُلُوبَهُمْ لِلتَّقْوَىٰ ۚ
لَهُم مَّغْفِرَةٌ وَأَجْرٌ عَظِيمٌ ٣

3. kuwa codkooda hoos u dhiga Rasuulka agtiisa kuwaasi waa kuwo Eebe imtixaanay quluubtooda dhawrsasho darteed, waxayna mudanyihiin dambi dhaaf iyo ajri wayn.

إِنَّ ٱلَّذِينَ يُنَادُونَكَ مِن وَرَآءِ ٱلْحُجُرَٰتِ
أَكْثَرُهُمْ لَا يَعْقِلُونَ ٤

4. kuwa kaaga dhawaaqi qolalka gadaashooda badankoodu wax ma kasayaan.

5. Hadday samraan intaad uga soo bixi yaa u khayr badnaan lahayda, Eebana waa dambi dhaafe naxariista,

وَلَوْ أَنَّهُمْ صَبَرُوا حَتَّىٰ تَخْرُجَ إِلَيْهِمْ لَكَانَ خَيْرًا لَّهُمْ ۚ وَاللَّهُ غَفُورٌ رَّحِيمٌ ﴿٥﴾

**Ruuxa mu‘minka xaqa ah waa inuu Eebe u hoggaansamo iyo rasuulkiisa, waxaan Eebe iyo Rasuulkiisu bannaynna (xalaalaynin) lagu deg degin waana in si adab iyo xushmad ah loo qaddariyaa Nabiga, si fiicanna looga asluubsadaa Eebe Quraankiisa iyo Nabiga Qoowlkiisa,**
**Aayadahanna dhamaan waxay mu‘miniinta ku hanuunin waynaynta Eebe iyo tixgalinta Nabiga iyo addeeciddooda, si loogu liibaano Adduunka iyo Aakhiraba. Al-Xujuraat (1-5).**

---

6. Kuwa xaqa rumeeyow hadduu idiinla yimaaddo faasiq war, hubsada, si aydaan dad u dhibin ogaansho la’aan, markaasna aad shallaydaan waxaad fasheen.

يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا إِن جَاءَكُمْ فَاسِقٌ بِنَبَإٍ فَتَبَيَّنُوا أَن تُصِيبُوا قَوْمًا بِجَهَالَةٍ فَتُصْبِحُوا عَلَىٰ مَا فَعَلْتُمْ نَادِمِينَ ﴿٦﴾

7. Ogaadana in Rasuulkii Eebe idin dhexjoogo, hadduu idinku addeeco waxyaala badanna aad dhibboonaysaan, wuxuuse Eebe idinla jeclaaday Iimaan, una qurxiyay quluubtiinna, wuxuuna idinla nacay gaalnimo, faasiqnimo iyo caasinnimo, kuwaasina waa kuwa hanuunsan.

وَاعْلَمُوا أَنَّ فِيكُمْ رَسُولَ اللَّهِ ۚ لَوْ يُطِيعُكُمْ فِي كَثِيرٍ مِّنَ الْأَمْرِ لَعَنِتُّمْ وَلَٰكِنَّ اللَّهَ حَبَّبَ إِلَيْكُمُ الْإِيمَانَ وَزَيَّنَهُ فِي قُلُوبِكُمْ وَكَرَّهَ إِلَيْكُمُ الْكُفْرَ وَالْفُسُوقَ وَالْعِصْيَانَ ۚ أُولَٰئِكَ هُمُ الرَّاشِدُونَ ﴿٧﴾

8. Waa fadliga (siinta) Eebe iyo naxariistiisa, Eebana wax walba waa ogyahay, waana falsame.

فَضْلًا مِّنَ اللَّهِ وَنِعْمَةً ۚ وَاللَّهُ عَلِيمٌ حَكِيمٌ ﴿٨﴾

9. Hadday Laba qolo oo mu‘miniinta ah dagaallamaan heshiisiiya dhexdooda, hadday midu ku xadgudubto tan kale la dirira tan xadgudubtay intay amarka Eebe uga noqoto (xaqa aqoonsato), Hadday u noqotana si caddaalad ah u wanaajiya dhexdooda una garsoora, Eebe wuxuu jecelyahay kuwa garsooree.

وَإِن طَائِفَتَانِ مِنَ الْمُؤْمِنِينَ اقْتَتَلُوا فَأَصْلِحُوا بَيْنَهُمَا ۖ فَإِن بَغَتْ إِحْدَاهُمَا عَلَى الْأُخْرَىٰ فَقَاتِلُوا الَّتِي تَبْغِي حَتَّىٰ تَفِيءَ إِلَىٰ أَمْرِ اللَّهِ ۚ فَإِن فَاءَتْ فَأَصْلِحُوا بَيْنَهُمَا بِالْعَدْلِ وَأَقْسِطُوا ۖ إِنَّ اللَّهَ يُحِبُّ الْمُقْسِطِينَ ﴿٩﴾

10. Mu‘miniintu waa uun walaala, ee wanaajiya walaalihiin dhexdooda, Eebana ka dhawrsada,waxaad u dhawdihiin inuu idiin naxariistee.

إِنَّمَا الْمُؤْمِنُونَ إِخْوَةٌ فَأَصْلِحُوا بَيْنَ أَخَوَيْكُمْ ۚ وَاتَّقُوا اللَّهَ لَعَلَّكُمْ تُرْحَمُونَ ﴿١٠﴾

**Ruuxa mu‘minka ah waa inuusan maqlin kutidhi kuteen iyo sheeko, si uusan Dad kale meel ugaga dhicin, markaasna nidaamo iyo shallayto ugu dambayn, waase in wax la hubsadaa, Kitaabka Eebe iyo Sunnada Nabigana la raaco’lana toosnaado oo xumaanta iyo gaalnimada laga fogaado, si mu‘min dhab ah loo noqdo, dadka mu‘miniinta ahna waa walaalo, waana inay is jeclaadaan isna gargaaraan, siduu Nabigu (Naxariis iyo nabadgalyo korkiis Eebe ha yelee) yidhi: « Muslimku waa walaalka muslimka’yuuna dulmiyin’yuunana dhiibin »,cidda gardaranna la qabto wanaaganna mu‘miniinta dhexdooda la yeelo illeen waa walaalee. Al-Xujuraat (6-10).**

11. Kuwa xaqa rumeeyow yuuna yasin Ragna Rag (kale) waxay u dhawdahay inuu ka khayr badanyahaye, Haweenna yayna haween yasin waxay u dhawyihiin inay ka khayr badanyihiine, hana ceebeynina Naftiinna, hana isugu dhawaaqina naanays xun, waxaa xun magaca faasiqnimada iimaan kadib, Ciddaan tawbad keeninna waa daalimiin.

يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا لَا يَسْخَرْ قَوْمٌ مِنْ قَوْمٍ عَسَىٰ
أَنْ يَكُونُوا خَيْرًا مِنْهُمْ وَلَا نِسَاءٌ مِنْ نِسَاءٍ عَسَىٰ
أَنْ يَكُنَّ خَيْرًا مِنْهُنَّ وَلَا تَلْمِزُوا أَنْفُسَكُمْ وَلَا تَنَابَزُوا
بِالْأَلْقَابِ بِئْسَ الِاسْمُ الْفُسُوقُ بَعْدَ الْإِيمَانِ
وَمَنْ لَمْ يَتُبْ فَأُولَٰئِكَ هُمُ الظَّالِمُونَ ﴿١١﴾

12. Kuwa xaqa rumeeyow ka dhawrsada wax badan oo mala ah, maxaa yeelay malaha qaarkiis waa dambi, hana is jaasuusina, qaarkiinna qaar yuusan xamanin, miyuu jecelyahay midkiinna inuu cuno Hilibka walaalkiis oo mayd ah, waad necebtihiin arrintaa, Eebana ka dhawrsada waa tooba aqbale naxariistee.

يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا اجْتَنِبُوا كَثِيرًا مِنَ الظَّنِّ إِنَّ بَعْضَ
الظَّنِّ إِثْمٌ وَلَا تَجَسَّسُوا وَلَا يَغْتَبْ بَعْضُكُمْ بَعْضًا
أَيُحِبُّ أَحَدُكُمْ أَنْ يَأْكُلَ لَحْمَ أَخِيهِ مَيْتًا
فَكَرِهْتُمُوهُ وَاتَّقُوا اللَّهَ إِنَّ اللَّهَ تَوَّابٌ رَحِيمٌ ﴿١٢﴾

13. Dadow waxaan idinka abuurray lab iyo dhaddig, waxaana idinka yeellay shucuub iyo qabiilooyin si aad isu aqoonsataan, Ruuxase ugu sharaf badan Eebe agtiisa waa ka idiinku dhawrsasho badan, Eebana wax walba waa ogyahay,

يَا أَيُّهَا النَّاسُ إِنَّا خَلَقْنَاكُمْ مِنْ ذَكَرٍ وَأُنْثَىٰ وَجَعَلْنَاكُمْ
شُعُوبًا وَقَبَائِلَ لِتَعَارَفُوا إِنَّ أَكْرَمَكُمْ عِنْدَ اللَّهِ
أَتْقَاكُمْ إِنَّ اللَّهَ عَلِيمٌ خَبِيرٌ ﴿١٣﴾

**Aayadahani waa Aayado la yaab leh, oo mu‘miniinta ku toosin kuna hanuunin waddada wanaagsan, ugana digi jidka xun sida xaqiraadda yasidda,Naanays xun isugu yeedhidda, is ceebeynta, tuhunka, malaha badan’iyo isjaasuusidda, dhammaan waxyaalahaasuna waa wax ku xun diinta Islaamka, Ruuxa mu‘minka xaqa ahna waa inuu ka fogaadaa dhibka walaalihiisa Muslimka iyo Xumayntiisa siduu Nabigu yidhi (Naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelee) «Ruuxa muslinka ah waa ka xaaraan muslimka, Xoolihiisa, Sharaftiisa iyo dhiiggiisaba, waxaana shar ugu filan Ruux inuu xaqiro walaalkiisa Muslimka ah». waxaa wariyay Abuu Daawuud iyo Tirmidi. Al-Xujuraat (11-13).**

---

14. Waxay dheheen ree baadiyihii carbeed waan rumaynay (xaqa), waxaad ku dhahdaa maydaan rumaynin, laakiin dhaha waan hoggansannay, Iimaankuna wali Quluubtiinna ma galin, haddaadse adeecdaan Eebe iyo Rasuulkiisa kama nusqaamiyo camalkiinna waxba, Eebana waa dambi dhaafe naxariista.

۞ قَالَتِ الْأَعْرَابُ آمَنَّا قُلْ لَمْ تُؤْمِنُوا وَلَٰكِنْ
قُولُوا أَسْلَمْنَا وَلَمَّا يَدْخُلِ الْإِيمَانُ فِي قُلُوبِكُمْ
وَإِنْ تُطِيعُوا اللَّهَ وَرَسُولَهُ لَا يَلِتْكُمْ مِنْ أَعْمَالِكُمْ
شَيْئًا إِنَّ اللَّهَ غَفُورٌ رَحِيمٌ ﴿١٤﴾

15. Kuwa mu‘miniinta ah waa kuwa uun rumeeyay Eebe iyo Rasuulkiisa

إِنَّمَا الْمُؤْمِنُونَ الَّذِينَ آمَنُوا بِاللَّهِ وَرَسُولِهِ

oon shakiyin, kuna Jahaada Xoolahooda iyo naftooda jidka Eebe dartiis, kuwaasi waa kuwa runlowga ah.

ثُمَّ لَمْ يَرْتَابُوا۟ وَجَٰهَدُوا۟ بِأَمْوَٰلِهِمْ وَأَنفُسِهِمْ
فِى سَبِيلِ ٱللَّهِ ۚ أُو۟لَٰٓئِكَ هُمُ ٱلصَّٰدِقُونَ ﴿١٥﴾

16. Waxaad dhahdaa ma Eebbaad usheegeysaan diintiinna isagoo og waxa Samaawaadka iyo Dhulkaba ku sugan, Eebana wax walba waa ogyahay.

قُلْ أَتُعَلِّمُونَ ٱللَّهَ بِدِينِكُمْ وَٱللَّهُ
يَعْلَمُ مَا فِى ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَمَا فِى ٱلْأَرْضِ ۚ
وَٱللَّهُ بِكُلِّ شَىْءٍ عَلِيمٌ ﴿١٦﴾

17. Waxay kugu mannaysan inay Islaameen, waxaad dhahdaa haygu mannaysanina Islaamkiinna Eebaa manna idinku leh inuu idinku hanuuniyay Iimaanka haddaad run sheegeysaan.

يَمُنُّونَ عَلَيْكَ أَنْ أَسْلَمُوا۟ ۖ قُل لَّا تَمُنُّوا۟ عَلَىَّ إِسْلَٰمَكُم ۖ
بَلِ ٱللَّهُ يَمُنُّ عَلَيْكُمْ أَنْ هَدَىٰكُمْ لِلْإِيمَٰنِ إِن كُنتُمْ
صَٰدِقِينَ ﴿١٧﴾

18. Eebe waa ogyahay waxa Samaawaadka ku maqan iyo dhulkaba, Eebana waa arkaa waxaad camal falaysaan.

إِنَّ ٱللَّهَ يَعْلَمُ غَيْبَ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضِ ۚ وَٱللَّهُ
بَصِيرٌۢ بِمَا تَعْمَلُونَ ﴿١٨﴾

Xaq rumaynta iyo Eebe aqoontu ma aha wax Ruux walba iska sheegan, ee waxay u baahantahay camal fal iyo Iimaan dhab ah, waana inaan la noqonin kuwo daahirka ka muslin ah hoostana aan Iimaanku qalbigooda galin, sida kuwa Aayaddu sheegeyso. Mu‘minka runta ah waa ka Xaqa si dhab ah u rumeeyay shakina galin, Xoolihiisa iyo Naftiisana Jidka Eebe ugu Jihaada, cid walbana Eebe waa ogyahay wuxuu yahay umana baahna in looga warramo, illeen isagaa wax walba oge, Islaamnimadana cidna ha ku mannaysan adaaba Eebe kuu sama falaye markuu kugu hanuuniyay Jidka toosan, isagaana manno kugu leh. Siduu Nabigu yidhi (Naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelee) Ansaareey miyaanan idin helin idinkoo baadi ah oo Eebe igu kiin hanuuniyay iyo idinkoo kala tagsan oo Eebe igu kiin kulmiyay, ood caydh ahaydeen oo Eebe igu kiin hodmiyay, markuu hadal dhahaba waxay dhahayeen Eebe iyo Rasuulkiisa yaa manno leh. Al-Xujuraat (14-18).

## Suurat Qaaf

## سُورَةُ قٓ ٥٠

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Eebe wuxuu ku dhaartay Quraanka sharafta leh (in dadka la soo bixin).

قٓ ۚ وَٱلْقُرْءَانِ ٱلْمَجِيدِ ﴿١﴾

2. Waxayse La yaabeen inuu u yimid dige ka mid ah oy markaas dheheen gaaladii kan waa wax la yaab leh.

بَلْ عَجِبُوٓا۟ أَن جَآءَهُم مُّنذِرٌ مِّنْهُمْ
فَقَالَ ٱلْكَٰفِرُونَ هَٰذَا شَىْءٌ عَجِيبٌ ﴿٢﴾